GUURKA IYO FURIINKA DENMARK

= Qoraalkani wuxuu ku saabsanyahay waxa ay dhigantahay marka laba qof si sharci ah isku qabaan

= RET TIL LIGESTILLING

SOMALI

Akhristaha sharafta mudanow
Buugan yari wuxuu ku saabsan yahay guurka iyo furiinka denmark. qoraalka ku qorani buugan yar waxaa looga gol leeyahay in dumarka iyo ragga lagu ogaysiiyo xuquuqaha la socda guurka iyo furiinka. waxaa sidoo kale qoraalkani uu qeexayaa farqiga u dhexeeya "guurka madaniga ah" ee laga diiwaan geliyey (ansixiyey) laamaha dowladda iyo "guurka aan madaniga ahayn" ee aan laga diiwaan gelin ama laga ansixin laamaha dowladda ee ku shaqada leh arimmaha guurka (sida dowladda hoose "kommune" ama cid kale oo ogolaansho u haysata isku guurinta dadka).

Buugan yar waxaa diyaarintiisa iska kaashaday Als Research, hay'adda qaxootiga (Dansk Flygtningehjælp) iyo Laan ka mid ah wasaaradda Isdhex-galka (Styrelsen for International Rekrutering og Integration).

Akhris wacan!

GUURKA IYO DENMAARK

Denmark dumarka iyo raggu waxay leeyihiin xuquuq isku mid ah marka laga hadlaayo guurka iyo furiinka. sidoo kale qof walbaiyayoo aan la eegayn inuu yahay dumar ama rag- wuxuu xaq u leeyahay inuu si iskiis ah, oo aan sharciga guurkana "ægtskabsloven" ka hor imanayn, u go'aansado waqtiga uu guursanayo iyo qofka uu guursanayo.

Lamaanaha wada nooli isma wada guursadaan. inta badan lamaanuhu way isla noolaadaan inta aanay is guursan ka hor. lamaanaha qaar ka mid ah ayaa doorta inay isla noolaadaan laakiin aanay weligood Is guursan. qaar ayaa doorta inay is guursadaan oo hadana is fura oo dad kale guursada mar labaad.

GUURKA IYO ANSAXNIMADIISA

Haddii lamaanuhu doonayaan inay helaan xuquuqo iyo waajibaadyo ka dhasha guurkooda, waa inay guurkooda ka sharciyeeyaan dalka iyadoo la raacayo shuruucda guurka ee Denmark. denmark waxaa guurka loo arkayaa inuu yahay mid sharci ah haddii labada qof uu isu guuriyey Imaam la aqoonsanyahay, duq magaalo (borgmester) ama qof kale oo awood sharci ah u leh inuu wax isu guuriyo.

Guur diimeed (religiøs vielse) uu sameeyey baadari, imaam ama cid kale oo aan ogolaansho ka haysan dowladda Denmark, ma noqonayo guur sharci ah. haddii qofka shaki kaga jiro in guurkiisu ansax noqonayo iyo in kale wuxuu la xiriiri karaa masjidka ama kaniisada uu ka tirsanyahay si uu u waydiiyo inuu jiro baadari ama imaam ogolaansho u haysta inuu dadka isu guuriyo.

Marka la is guursanayo waa in labada qofka si iskood ah isu guursadaan. sidoo kale waa shuruud in labada qofka goob joog ahaadaan marka la isu guurinayo, waana inay qaan-gaar ahaadaan waqtiga ay is guursanayaan. waxaa sidoo kale shuruud ah in labada qofba aanay is qabin dad kale iyo in labada qof aanay wadaagin xiriir qaraabonimo oo dhow. haddii labada qof midkood uu xaas yahay ama yahay lamaane qof kale si sharci ah ula diiwaan gashan, waa inuu marka hore iska furo qofka ay is qabeen ama isu diiwaan gashanaayeen inta aanu geli guur cusub. denmark waxaa ka mamnuuc ah in qofku guursado hal qof ka badan. haddii qofku guursado isagoo ay is qabaan qof kale, guurka cusub wuxuu ka hor imaanayaa sharciga dalka qofkuna wuxuu mudan karaa ciqaab xabsi (xadhig) ah.

Si guurku sharci uga noqdo Denmaark waa in laga helaa shuruudaha soo socda:

- *Guurka waa inay fuliyaa qof ogolaansho u haysta inuu dadka isu guuriyo*
- *Lamaanuhu waa inay yihiin 18 jir*
- *Waa in labada qofba goob*
- *Labada qofba waa in aanay is qabin ama guur kala dhaxayn dad kale*
- *Labada qofba waa inay aqbalaan inay is guursadaan*
- *Qofka ogolaanshaha u haysta inuu dadka isku guuriyo isla markaasna isu guurinaya labada qof waa inuu ku dhawaaqaa in lamaanuhu is guursadeen.*
- *Guurku waa in aanu ahayn guur been been ah oo ujeedooyin kale looga gol leeyahay (proformaægtskab).*

Si qofku ugu guursado Denmaark, waa inuu haystaa caddayn (attest) ku saabsan inuu buuxiyey shuruudaha guurka. warqada cadaynta ah qofku wuxuu ka heli karaa dowlada hoose (kommune). haddii labada qof ee is guursanaya ama midkood yahay qof aan Daanish ahayn, isla markaasna aan haysan deganaashaha abadiyada ama aan xaq u lahayn inuu helo deganaanshaha abadiyada shuruucda u yaal EU-da awgeed, warqada cadaynta ah wuxuu ka raadsan karaa Familierethuset.



GUURKA JAJUUBKA AH (QASABKA AH)

Guurka waa la diidi karaa, haddii guurku ku dhacay si qasab ama jajuub ah. Denmaark waxay ka tahay dembi in dadka lagu qasbo guur aan dookhooda ahayn. dembiga arintan ka dhalan kara waxaa lagu mutaysan karaa ciqaab xarig ah. guurka qasab wuxuu noqon karaa guur diimeed ama guur madani ah.

Haddii aad dareentid in lagugu qasbayo guur aadan doonayn, waxaan caawinaad ka heli kartaa kommuunkaaga ama telefonka 70 20 30 82.
telefonkani waa hotline ah oo 24-ka saacba furan waxaana talo bixin ka heli kara dumarka, ragga iyo qaraabada. sidoo kale tacadiyada ay geystaan dadka qaraabada dhow ah iyo fursadaha aad ku geli karto xarumaha loogu talo galay dadka dhiban (krisecenter) ka aqri halkan: www.levudenvold.dk

Dhalinta dumarka iyo ragga ah waxay sidoo kale la xiriiri karaan rugta talo-bixinta ee RED tlf. 70 72 76 66. RED waxay dadka la soo xiriira siisaa talooyin la xiriira khilaafyada la xiriira meel kaga dhaca sharafta qoyska (æresrelaterede). sidoo kale rugta talo-bixinta ee RED waxay leeyihiin qayb la talisa waalidiinta, waxaana qaybtan laga soo xiriiri karaa tlf.70 27 03 66. sidoo kale eeg mareegtan www.red-center.dk/raadgivning

AQOONSIGA GUURKA KA DHACA DALKA DIBADIISA AH

Haddii qofku ku guursado meel ka baxsan Denmark, guurkaas waxaa loo aqoonsan karaa mid sharci ku dhisan, haddii guurku ka sharciyeysan yahay dalka guurku ka dhacay. waxaase jira kara arimo keeni kara in guurkaaga Denmark laga aqoonsan waayo sida haddii tusaale ahaan aysan labada qof wada joogin halkii guurku ka dhacayey, ama labada qof ee is guursanayey midkood aanu qaar-gaar ahayn (ka yar yahay 18 san) waqtiga guurka.

Aqoonsiga waraaqaha guurka ee ka soo baxa dal kale waxaa ka dhalanaya in labada qof isku qabaan si waafaqsan shuruucda Denmark oo ay ka mid yihiin xuquuqda iyo waajibaadka ay isku leeyihiin labada qof ee is qaba. sua'aasha la xiriirta aqoonsiga waraaqaha guurka ee lagu sameeyey meel ka baxsan Denmark waxay inta badan timaadaa, marka la eegayo kiis guur ama furiin ah, si loo xaqiijiyo in labada qof isku qabaan si wafaaqsan shuruucda Denmark iyo in kale.

Mararka qaar waxay dadku la yimaadaan dhammaan waraaqihii loo baahnaa si loo aqoonsado guurkooda isla markaasna loogu diiwaan geliyo inay yihiin lamaane is qaba. laakiin waxaa dhacda in mararka qaar loo baahdo dukumenti ama waraaqo dheeraad ah oo la xiriira guurka labada qof. bogga www.borger.dk waxaad ka eegi kartaa in guurkaagu Denmark ka diiwaan gashan yahay iyo in kale. qofkii doonaya in guurkiisa ajnabiga ah laga sharciyeeyo Denmark, waa in uu la xiriiraa waaxda degmada (kommune) u qaabilsan diiwaan gelinta dadka (folkeregisteret).

MACNAHA AY SAMAYNAYSO HADDII GUURKU YAHAY MID SHARCIYEYSAN

Marka guur labada qof yahay mid diiwaan gashan (borgelig gyldtigt), sida sharcigu qabo waxaa ka dhalanaya arintan xuquuqo iyo waajibaadyo ay isku leeyihiin labada qof ee is qaba. xuquuqaha iyo wajibaadyada guurka ee ugu muhiimsan waxaa ka mid:

MAS'UULIYADDA CARUURTA OO LA WADAAGO
Marka la is guursado, hadii ilmo dhasho, lamaanuhu waxay si toos u helayaan mas'uuliyadda ilmahooda. taas oo macnaheedu yahay in labada waalid si wada-jir ah mas'uul uga yihiin caruurtooda. sidoo kale waalidku waxay talo-wadaag ku yihiin arimaha caruurta iyo go'aan ka gaarista wixii dan u ah caruurtooda.

MAS'UULIYADDA MASRUUFKA
Marka la is guursado labada qof waxay isku leeyahay inay is-masruufaan sida uu dhigayo sharciga dhaqaalaha lamaanaha is qaba. taageerada dhaqaale (biilka) ee qofku ka helo lamaanihiisa, dowladdu kama qaado wax cashuur ah. sidoo kale waxa jira sharciyo gaar ah oo la xiriira dhanka cashuurta oo si wada-jir ah loogu cashuuro dhaqaalaha lamaanaha is qaba.

XUQUUQDA IS-DHAXLIDDA
Lamaanaha is qaba haddii midkood dhinto, isagoo aan tegin wax dardaaran ah ama caruur, qofka nool ayaa dhaxlaya dhammaan hantida qofka dhintay. sidoo kale waxaa laga cafinayaa in qofku bixiyo kharashka dhaxalka. haddii ay caruur jirto, xaaska laga geeriyooday wuxuu dhaxal ahaan u helayaa 50% hantida. halka dhammaan caruurtu helayaa 50% soo haray.

HANTI-WADAAGIS
Marka labada qof is guursadaan waxay si toos ah u wadaagayaan hantidooda. taas macnaheedu ma ahan in aanu qofku gooni wax u yeelan karin inta uu xaaska yahay ee waxaa loola jeeda in hantida si siman loo qaybin doono haddii furiin yimaado. waxaa lamaanuhu inta aysan is guursan ka hor ama marka ay is guursadaan ka dib gaari karaan heshiis kala cadaynaya hantida qof walba gaarka u leeyahay. heshiis noocan kale ah oo ay lamaanuhu ku heshiiyaan waxay ka dhigantahay in aan hantida la kala qaybin doonin haddii labada ruux is furaan.

GUUR-DIIMEEYADA AAN SIDA SHARCIGA AH U DIIWAAN GASHANAYN

Haddii labada qof uu isu guuriyo wadaad diimeed aan ogolaansho u haysan inuu dadka isu guuriyo, guurkaasi noqon maayo mid ansax ama rasmi ah. dumarka qaarkood oo ay u guuriyaan wadaado aan ogolaansho haysan ayaa doorta inay ka lug baxaan guurka kadib marka raggooda kala kulma qabado iyo khilaafaad faro badan.

Waxaa jira qaabab badan oo jaaliyadaha kala duwan ee ku dhaqan Denmark u sameeyaan furiin-diimeedyada "religiøse skilsmisser". tusaale ahaan dumarka qaarkood ayaa caqabado kala kulma furiin-diimeedyada sababtoo ah waxaa furiinka-diimeed diida raggooda, qoysaskooda ama asxaabtood, sababtoo ah guur-diimeedka ayaan inta badan dumarka iyo ragga siin xuquuq isku mid ah marka laga hadlayo furiinka.

Shuruucda daanishka kuma jirto hab-raac loo maro furiin-diimeedyada. sidaas darteed qofka raba inuu iska furo qof uu ku guursaday qaab guur-diimeed ah aad ayey ugu adkaan kartaa qofka wuxuu uu yeeli lahaa ama halkuu caawinaad u doonan lahaa. Sidaas darteed waxaa muhiim in la fahmo in guurka noocan oo kale ahi lahayn ansax sharci ah. sidoo kale qofku ma helayo xuquuqihii sharcigu siin heli haddii guurku ahaan lahaa mid rasmi ah. haddii aanu guurku ahayn mid si rasmi ah u diiwaan gashan, sharci ahaan qofku dhanka dowladda wuxuu ka xisaabsan yahay qof aan xaas lahayn, waxaana sharciga dalku xaq u siinayaa inuu guursado hadduu sidaas doonayo, isagoo dheg u jalaq siinayn cidii arinkaas ka hor timaada sida tusaale ahaan qofkii ay sida guur-diimeedka ah isku qabeen ama qoyskiisa iyo asxaabtiisa.

Jaaliyadaha ku dhaqan dalka qaarkood ayaa aaminsan in guur-diimeedku si toos ah u bur-burayo isla markaba haddii famileretshuset kala furto lamaane guurkoodo si sharci ah u diiwaan gashanaa. haddii la isku guursanayo hab guur-diimeed ah waxaa wanaagsan in heshiiska guurka lagu caddeeyo in qofka dumarka ahi xaq u leedahay inay ninkeeda iska furi karto si la mid ah sida ninku xaq ugu leeyahay inuu xaaskiisa furo. shuruud noocaas ah haddaan lagu caddayn heshiiska guur-diimeedka waqtiga la is guursanayo, waxaa lagu soo dari karaa marka guurku dhaco ka dib.

Haddii qofku ka fursan waayo inuu maro habka guur-diimeedka, waxaa iyana muhiim in qofku guurkiisa u sharciyeeyo sida uu qabo sharciga guurka Denmark, si qofku helo xuquuda la xiriirta furiinka.

Haddii ay niyadda kaaga jirto inaad u guursatid habka guur-diimeedka, ama aad ku guursatayba, aadna doonaysid inaad ogaatid xuquuqdaada, waxaad soo wici kartaa telefoonka joogtada ah ee rugta talo-bixinta ee RED 70 27 76 66. teleefanku waa mid furan 24-ka saac maalintii, asbuuca oo dhan. waxaad sidoo kale warqad u soo diri kartaa xarun RED. telefonka iyo waraaqda markaad soo diraysid looma baahna inaad sheegtid qofka aad tahay (anonym). sidoo RED way kaa caawinaysaa haddaad u baahan tahay goob amaan ah oo aad degtid si aad u baxsatid guur-diimeed.

KALA-TAGGA IYO FURIINKA

Denmark dadku iyaga ayaa gaara go'aanka furiinka. qasab ma ahan in qofku sheego sababta uu u dalbanayo furiinka. dumarka iyo ragguba waxay xaq u leeyihiin inay dalbadaan furiin, iyadoo aan la eegayn in qofka kale raali ka yahay furiinka iyo in kale. Dumarka iyo raggu sida uu dhigayo sharciga dalku way u siman yihiin furiinka. taas oo macnaheedu yahay in labada qofba ay si isku mid ah u dalban karaan furiinka. sidoo kale dumarka iyo raggu way u siman yihiin shuruucda guurka iyo furiinka.

Haddii qofku doonayo furiin ama kala-tag wuxuu ka dalban karaa Familieretshuset. haddii aanu qofku ku wanaagsanayn isticmaalka internetka, wuxuu caawinaad ka raadsan karaa xarunta adeegga dadweynaha (borgerservice) ee degmada uu degan yahay ama maktabadda (biblioteket).

FURIIN KU-HESHIIN (IS AF-GARAD)

Haddii lamaane ku heshiiyaan inay is furaan, waxay si toos ah u dalban karaan furiin halkii ay markii hore ka dalban lahaayeen kala-tegis (separation). haddii lamaanuhu haystaan caruur ka yar 18 sano, furiin toos ah inay dalbadaan ka sokow waxay sidoo kale arimaha hoos ku qoran:

- *inay soo dhamaystaan muddo 3 bilood ah oo ay kaga soo fekerayaan go'aanka furiinka ah ee ay qaateen.*
- *inay soo dhamaystaan koorso (forløb) online ah oo ku saabsan wada shaqaynta waalidka furiinka ka dib (SES- Samarbejde Efter Skilsmisse).*
- *inay soo gudbiyaan codsiga furiinka 4 bil gudaheed.*

Mudada ka-soo-fekeridda go'aanka furiinka waxaa loogu talo galay in waalidku helaan fursad iyo waqti dheeri oo ay kaga fekeraan go'aanka ay ku gaareen furiinka iyo weliba sidii - haddii ay is-furaanuga wada shaqayn lahaayeen mustaqbalka iyo xanaanaynta caruurtooda.

FURIIN KU-HESHIIN LA'AAN (IS AF-GARASHO LA'AAN)

Haddii furiinka uu doonayo hal qof oo ka mid ah labada qof, waxaa marka hore la marayaa muddo dhan 6 bil oo labada kala guurayaan (separationsperiode). inta lagu jiro muddada kala-tagga labada lama ogola inay isla deganaadaan, sidoo kalena isma dhaxli kara-

an haddii midkood geeriyooda. labada qof midkoodna ma guursan karo dad kale in lagu jiro mudada kala-tagga. marka ay dhamaato muddada kala-tagga ayey labada is furi karaan haddii ay heshiis ku yihiin furiinka iyo haddii kaleba. qofka ayaa laga rabaa inuu dalbado furiinka. furiinku si toos ah diiwaanka uma galo marka la soo maro habka kala-tagga (seperaionsperiode).

FURSADDA FURIINKA DEG-DEGA AH

Waxaa jira waqtiyo qofku isla markaba heli karo furiinka iyadoo aan loo baahan in la soo maro muddada kala-tagga iyo ka-soo-fekerida.

Waqtiyada furiinku noqonayo deg-deg waxaa ka mid haddii ay jiraan arimaha hoos ku qoran:

- *Haddii labada qof midkood sameeyey gogol dhaaf (utro).*
- *Haddii labada qof isku gaystaan tacadi ama garaacid*
- *Haddii labada qof mid ka mid ahi si aan sharci ahay dibadda ugula dhoofo caruurtii labda qof ka dhexeysay.*
- *Haddii la ogaado In labada qof midkood xaas leeyahay.*
- *haddii labada qof Isfaham la'aan awgeed Isla noolayn labada sano ee u dambaysay.*



FURIINKA GUURKA LAGU GALAY DALKA DIBADIISA

Haddii qofku ku soo guursaday dalka dibadiisa, qofku furiin waa ka dalban karaa Denmark haddii guurka horay looga sharciyeeyey Denmark iyo weliba dalkii shisheeye ee qofku ku soo guursaday isla markaasna la heli karo dukumentiyada iyo waraaqii guurka.

Haddii aad qabtid su'aalo la xiriira kala-tagga iyo furiinka waxaad wici kartaa telefoonka xarunta Familieretshuset oo ah 72 56 70 00 ama ka aqri wixii macluumaad dheeri ah ee aad u baahan tahay website-ke familieretshuset www.familieretshuset.dk. isla website-kan ayaad sidoo kale ka dalban kartaa furiinka.

FURIINKU WUXUU SAAMAYN KU YEELAN KARAA SHARCIGA DEGAANSHAHA (CIQAAMADA) HADDII QOFKA DALKA LAGU SOO GELIYEY XAAS AHAAN (FAMILIESAMMENFØRT).

Haddii qofku sharciga degaanshaha (ciqaamadda) ku helay nidaamka isku-keenidda qoyska ama xaas ahaan (familliesammenføring), isla markaasna ay kala tagaan qofkii dalka keenay, sida caadiga qofka waa lagala noqonayaa deganaanshaha.

Waxaa laakiin jira fursado qofka u saamixi kara inii sharcigiisa deganaanshaha sii haysan karo furiinka ka dib haddii ay duruufo shakhsi ah oo qofka ku noqon kara culays haddii sharciga laga qaado. waxaa duruufahaas shakhsiga ka mid ah, tusaale ahaan, haddii qofku waalid u yahay caruur dalka ku nool.

Waxaa sidoo kale jira fursado gaar ah oo sababi kara in qofku sii hayso deganaanshihiisa haddii qofku la kulmay tacaddi ama dhibaato. waxaase shardi ah in qofku la kulmo tacaddi jir-ahaan ah (garaacid) ama tacaddi nafsiyan ah (bahdil, sharaf dil iwm), waana in tacaddiga qofka loo gaystay yahay mid diiwaan gashay (sida in booliiska iyo maxkamaduhu ogyihiin). waxaa intaas dheer in la caddeeyo in tacaddigu sababay furiinka.

Sidaas oo jirta haddana ma jirto cid dammaanad qaadi karta in qofku sii haysanayo sharciga deganaanshaha xataa haddii qofku leeyahay caruur dalka degan ama ay jirto caddayn la xiriirta in qofta tacaddi loo geystay, tacaddigaasina si toos ah keenay furiinka.

Haddaad u baahan tahay talo-bixin la xiriirta fursadaha aad ku sii deganaan kartid Demarka furiinka ka dib, waxaad la xiriiri kartaa sharci-yaqaano ka tirsan qolooyinka caawiya dadka tacaddiga loo geysto (Lev Uden Vold). waxaad kala xiriiri kartaa tlf. 31 18 44 41.

CARUURTA IYO FURIINKA

Marka lamaanuhu kala tagaan, waxay weli sii wadaagayaan mas'uuliyadda caruurtooda. inkastoo labada qof isfureen waa inay waalid ahaan sii wadaan wada-shaqayntoodii dhanka caruurta. waana in labada qof ku heshiiyaan go'aanada muhiimka u ah nolosha caruurtooda.

HOYGA, BOOQASHADA CARUURTA IYO MASRUUFKA

Marka labada qof isfuraan waa inay go'aan ka gaaraan waalidka ilmuhu la degayo iyo inta jeer ee waalidka kale arkayo ilmaha. waxaa sidoo kale lagu heshiin karaa in ilmuhu labada qofka la degayo (delt bopæl).

Xarunta Familieretshuset ayaa adeegyo dhowr ah u fidisa waalidka isku af-garan waaya qofka qaadanaya mas'uuliyadda ilmaha, qofka ilmuhu la degayo ama inta jeer ilmuhu arkayo waalidka kale. waxay sidoo kale xaruntu caawinaad u fidisaa caruurta.

Waxaa sidoo kale jira ururo kala duwan oo laga heli karo talo-bixin ku saabsan furiinka. ururadan waxaa ka mid ah hay'adda Børns Vilkår oo leh qayb caawinta waalidiinta " forældretelefon" iyo qaybta caawisa hooyada "mødrehjælpen". waxaad sidoo kale bogga borger.dk ka aqrin kartaa qoraal hagid ah oo ku saabsan furiinka " når i går fra hinanden".

Waalidka waxaa mar walba waajib ku ah inay mas'ruufaan caruurtooda haddii ay wada degan yihiin iyo haddii kaleba. haddii labada waalid isku af-garan waayaan mas'ruufka ilmaha, waalidka ilmuhu la nool yahay wuxuu Familieretshuset ka codsan karaa in mas'ruufka ilmaha (børnebidrag) laga soo gooyo waalidka kale. lacagta waalidka laga soo goynayaa waxay ku xiran tahay dakhliga qofka soo gala inta uu le'eg yahay.

Marka laga reebo mas'ruufka ilmaha ee laga soo gooyo waalidka kale, waxaa jira caawinaado dhowr oo dowladdu siiyo waalidka ilmuhu la nool yahay si loogu fududeeyo nolosha iyo mas'ruufka ilmaha. tusaale ahaan waalidku wuxuu dalban karaa lacagta caawinaad ilmaha (børnetilskud) ee la siiyo waalidka keliga ah ee mas'ruufa caruurtiisa. caawinaada qofka lagu siinayo ilmaha waxay ku xiran tahay dakhligiisa (dhaqaalihiisa). waxaa laga yaabaa in qofka laga dhaafo lacagta xanaanada caruurta (fripladstilskud).

Macluumaad la xiriira fursaha caawinaada ah ee waalidka keligiis ah ku heli caruurta waxaad ka aqrisan kartaa bogga borger.dk ”når i går fra hinanden”.

Furiinka ka dib haddii aad ku heshiin waydaan mas’uuliyadda il-maha(forældremyndighed) , degaanka ilmaha (bopæl), waqti la qaadashada ilmaha (samvær) ama masruufka ilmaha, waxaan caawinaad ka raadsan kartaa Familieretshuset tlf. 72 56 70 00. sidoo kale wixii macluumaad dheeri ah ka eeg boggan www.familieretshuset.dk.

Qoraalkani wuxuu ku saabsan yahay guurka iyo furiinka denmark. qoraalka ku qorani buugan yar waxaa looga gol leeyahay in dumarka iyo ragga lagu ogaysiiyo xuquuqaha la socda guurka iyo furiinka. waxaa sidoo kale qoraalkani qeexayaa farqiga u dhexeeya "guurka madaniga ah" ee laga diiwaan geliyey (ansixiyey) laamaha dowladda iyo "guurka aan madaniga ahayn" ee aan laga diiwaan gelin ama laga ansixin laamaha dowladda ee ku shaqada leh arimmaha guurka (sida dowladda hoose "kommune" ama cid kale oo ogolaansho u haysata isku guurinta dadka).

Haddii ay niyadda kaaga jirto inaad u guursatid habka guur-diimeedka, ama aad ku guursatayba, aadna doonaysid inaad ogaatid xuquuqdaada, waxaad soo wici kartaa telefoonka joogtada ah ee rugta talo-bixinta ee RED 70 27 76 66. teleefanku waa mid furan 24-ka saac maalintii, asuuca oo dhan.

MINISTER FOR LIGESTILLING

Udlændinge- og Integrationsministeriet

Styrelsen for International Rekruttering og Integration